


# Dareemayaasha adag way yimaadaan, wayna tagaan



CANADIAN CENTRE *for* CHILD PROTECTION®  
*Helping families. Protecting children.*



NEW DIRECTIONS



**Dareemayaasha  
adag way yimaadaan,  
wayna tagaan**



**Xuquuqda naqashada iyo qaabayntu, waxay u dhawran tahay, Canadian Centre for Child Protection Inc. © 2018. iyo New Directions for Children, Youth and Families-na waxa ay leeyihiiin xuquuqda qoraalku ka kooban yahay (copyright © 2018). Dhammaan xuquuquhu way dhawran yihinn. Way reebban tahay, in qay qoraalka ka mid ah la soo dejisto amase la daabaco. Lama oggola, in qayb qoraalka ka mid ah, la sii badiyo (koobiyeeyo) ama si kale loo faafiy. Waxaa kale oo aan banaanayn, in kaydsi lagu sameeyo, qaybaha kala duwan ee qoraalkan, iyadoo ujeedaddu tahay faa'iido ama ganacsi kale. Waalidiinta iyo mas'uulada, way la soo degi karaan, soo saaran karaan, qaybo ka mid ah, qoraalkan. Waa haddii ay si is a hu isticmaalayaan oo qudha. Waxaa kale oo isticmaalku u furan yahay, rixfadlayaasha shaqaale ee shaqo-hawleedkooda u adeedgsan.**

Soo saarida buuggu, ma suurtoowdeen, haddii, ayna shaqo adag iyo dadaal dheeri ah, gelin lahayn, New Directions iyo Canadian Centre wadar ahaan. New Directions iyo Canadian Centre. New Directions, waxay si gaar ah ugu mahad-celinayaan, Kate Kiernan iyo Billy Brodovsky oo door lixaad leh, qoraalka ka geystey,.Canadian Centre-na waxay si gaar ah ugu mahad-celin, waaxdeeda, waxbarashada iyo kooxda mashruu-naqshadaynta ee mashruuca isku dubba-riday.



**CANADIAN CENTRE for CHILD PROTECTION®**  
Helping families. Protecting children.

Canadian Centre for Child Protection Inc. (Canadian Centre) waa ururr samafal oo diiwaan gashan. Ururka shaqadiisu waxay tahay, hawl-galada ammaanka carruurta gaarka ah. Canadian Centre wuxuu bixiyaa barnaamijyo tiro badan iyo adeegyo kale, si uu muwaadiniinta reer Kanada uga caawiyi, ilaalinta xuquuqda carruruta iyo yaraynta khatarta ah, in carruurtu dhibaatooyin ay la kulmaan. Waaad war-bixin dheeri ah ka heli kartaa ,mareegta intarneedka ee Canadian Centre oo ah: [www.protectchildren.ca](http://www.protectchildren.ca).



New Directions for Children, Youth and Families (New Directions) Ma aha urur ganacsi ku dhisan. Ururku wuxuu bixiya adeegyo fara badan oo la xidhiidha, xaaladaha isbed-beddel ee dhanka arrimiha bulshada, cilmi-nafsiiga, dhaqanka, baahiyaha la xidhiidha waxbarashada iyo xirfadaha aaddamaha. New Directions waxay bixisaa, barnaamijyo laga bilaabo talo-bixinta qoyska illaa iyo caawinta dhallinyarada ee tababarda xagga shaqada. Waxaa kale uu ururku ka shaqeeyaa, goobo deegaan-daryeel oo dhanka qoysaska khuseeya. Waxaa kale oo adeegyo uu ururku siyaa, dadka maanka ka dhantaalan amase maqalkoodu hooseeyo iyo dadka asal-dagaameedka ah . Waaad war-bixin dheeri ah ka heli kartaa, mareegta intarneedka ururka ee ah: [www.newdirections.mb.ca](http://www.newdirections.mb.ca).

CANADIAN CENTRE for CHILD PROTECTION wuxuu ka diiwaan gashanyahay Kanada, waana summad ay leedahay Canadian Centre for Child Protection Inc. Astaanta New Directions waxaa iska leh, New Directions for Children, Youth and Families.

Buuggan wuxuu ku salaysan yahay Big Feelings Come and Go (*Dareemayaasha adag way yimaadaan, wayna tagaan*) waxaa markii ugu horraysay isagoo luuqada af-ingriiska ku qoran daabacday, New Directions for Children, Youth, Adults and Families, 500-717 Portage Ave. Winnipeg, Manitoba Canada iyo Canadian Centre for Child Protection Inc., 615 Academy Road, Winnipeg, Manitoba, Canada, kuwaas oo sidoo kale xuquuqda qoraalkan, qayb ku leh. Barnafrid, xarunta xasiloonidda carruurta iyo bar-aqooneedka hagar-daamooyinka carruurta ee Jaamacadda Linköping, ayaa oggolaansho ka heysata, xaqalaha buugga, ku turjumida af-iswiidhishka, af-carabiga,af-daariga iyo af-soomaaliga. Xog dheeri ah waxaad ka heli kartaa,mareegta interneedka ee ah [www.barnafrid.se](http://www.barnafrid.se). Jaamacadda Linköping ayaa si buuxda u qaadansaya, mas'uuliyada turjumida iyo dhammaan il-duufyadda laga yaabo ee turjumaadda. Barnafrid iyo Jaamacadda Linköping ayaa si buuxda sidoo kale u qaadaysa, mas'uuliyada, dhammaan wixi lagu daro iyo waxyaabaha aan qaybta ingiriiska ku jirin. Xuquuqda faafinta ee turjumaada af-iswiidhishka, af-carabiga, af-daariga iyo af-soomaaliga, waxaa iska leh, New Directions for Children, Youth, Adults and Families iyo Canadian Centre for Child Protection Inc. Dhammaan xuquuquhu way dhawran yihin.

This book is based on *Big Feelings Come and Go* which was first published in English by, and is copyright 2021 of, New Directions for Children, Youth, Adults and Families, 500-717 Portage Ave., Winnipeg, Manitoba Canada and the Canadian Centre for Child Protection Inc., 615 Academy Road, Winnipeg, Manitoba, Canada. Barnafrid, a program of Linköping University, with permission from the copyright owners, translated the contents of the original Book into Swedish, Arabic, Dari, Spanish, and Somali. Linköping University assumes all liability for the accuracy of and any errors and omissions in translation. Any content that is not in the English version has been added by the Linköping University, which takes full responsibility for any additions. Copyright in the Swedish, Arabic, Dari, Spanish, and Somali translation belongs to New Directions for Children, Youth, Adults and Families; and the Canadian Centre for Child Protection Inc. All rights reserved.

# Hordhac

Dareemayaasha adag way yimaadaan, wayna tagaan, waxaa laga soo turjumay, buugga Kanada laga leeyahay " Big Feelings Come and Go". Buuggan waxaa loogu tala galay, in loo adeegsado xaalandaha dabib ee la xidhiidha carruurta ay la soo daristey, xasuusaha xanuunada iyo dareemada adag ee PTSD-ga ama xaalad kale oo reebta xasuusaha ma-hadhooyinka reeba. Wuxaan mahad balaadhan u celinaynaa, Canadian Centre for Child Protection iyo New Directions for Children, Youth, Adults & Families, kuwaas oo buuggan soo saaray, si wada shaqayn gacan furnaani ku dheehan tahayna ugu suurta-geliyay, in Barnafrid af-iswiidhish, af- isbaanish, af-dari iyo af-soomaaliba ay aqoon muhiim ah ugu gudbiyaan carruurta. Turjumaadani waxay qayb ka tahay hawl-dawladeedka loogu yeedho "Trauma på kartan"

Buugga waxaa lagu qeexayaa, fal-celimeedyo, qofku la yimaado, marka uu soo maray, karkabahaha xanuunada xasuusaha adag ku reeba, ma-hadhooyinka(post traumatiske stress), kuwaas oo ah, sida, difaaca, cararka iyo **bowda ka ma-hadhooyinka (quwad-jabka)**. Waxaa kale oo buuggan lagu sharixi doonaa, tabbaha iyo xeeladaha ugu fudud ee dareen xakamyanta loo samayn karo.

Aqoonta ku saabsan dareemada guud, fikirada iyo hab fal-celimeedyada, markuu qof soo maray, xasuusaha adag ee ma-hadhooyinka reeba (**Trauma**) ayaa sidoo kale qayb ka ah.

In carruurta iyo dadka waaweyn ay bartaan, fikirada iyo dareemada ka dib soo marida xasuusaha ma-hadhooyinka reeba, waxay u fududayn, garashada iyo dhixdhexaad ka dhigida dareemadda iyo fikirka. Qoraalkan waxaa loogu talo-galay, in uu hage u noqodo, wada-hadalka ilmaha iyo daryeelayaasha ilmaha, si loo barto, hab fal-celimeedyada iyo baahiyaha gaarka ah ee carruurta.

Qaabka dabibbka wax barid ee (Psykoedukation) iyo tabaha maan-maaraynta ("Copingsstrategier" waxaa la bari karaa carruurta, si carruurtu u bartaan siyaabaha loo xakameeyo, cabsiyaha adag. Mar kasta uu ilmuu yahay mid yar, ahimyad gaar ah bay leedahay, in dadka u dhow ama muhiimka u ah ilmaha ay qayb ka yihiin.

Carruurta muhiim bay u tahay, aqoonta uu daryeel-bixiyuhu u leeyahay, dareemada iyo tabbaha dareenmada loo xakameeyo ee buugga ku dhix jira. Buuggani waxaa kale uu wax tar u leeyahay, dadka waaweyn. **Dareemayaasha adag way yimaadaan, wayna tagaan, waxaa si wada jir ah u akhrin kara, daryeelaha iyo ilmaha si uu halkaas uga dasho, wada hadal ku saabsan, wixii ilmaha soo maray iyo khibradihiisa/teeda. Ku celcelintu waxay dhalisaa, abuurida, jawi degen iyo fahan dheeri ah.**

Waxaan rajaynayaa, in carruur badani ay fursad u helaan, in ay bartaan, in **dareemayaasha adag ay yimaadaan, ayna tagaan sida daruuraha taga ee haddana oo kale**.



Poa Samuelberg iyo Maria Schillaci,

CILMINAFSIYAHANNO, AQQONI DHEERI AH LEH, KANA SHAQEYYA  
— XARUNTA QARANKA EE AQQONTA KU AADDAN U GACAN DHIB-GAADHSIINTA CARRURTA EE JAAMACADDA LINKÖPING


**BARNAFRID**  
**LINKÖPINGS UNIVERSITET**

Turjumida iyo eegidda af-soomaaliga

Yassin Ekdahl iyo Qalinle Dayib

Waxaan hadda wax ka baran doonaa,  
waxa jidhka ku dhaca, marka aan  
dareeno, cabsi amase dareemada kale  
ee adag.





Maskaxdu waxay leedahay  
qayb digniinnta u qaabilsan  
(maan-dige). Qabtaas waxaa  
la dhahaa, **Amygdala**.





Maan-digaha maskaxdu,  
wuxuu digniin si iskii ah u  
bixiyaa, marka aan dareeno,  
welel amase cabsi.

Digniinta maan-diguhu,  
wuxuu inaga caawiyaa,  
sidaan u badbaadi lahayn.

Marka uu maan-diguhu digniinta bixiyo, jidhku  
wuxuu isku diyaariyaa, difaac, carar(ored) **amase**  
**is-dhiibid (quwad-jab).**



Waxaa dhacda in aan dareeno, dhaqaaq la'aan  
iyo talladda ama fikirka oo baaha.

Arrintaas waxaa loo yaqaan **is-dhiibid**  
**ama quwad-jab.**

Marmarka qaarna, waxaan  
dareenaa, ina naftu carar ama  
meesha ka fogoow in tidhaahdo.

Arrintaas waxaa loo yaqaan **cararid**.



Mararka qaar, waxaan  
dareenaa, in aan is-  
difaac(caabin) samayno. Ka  
dibna qaylo afka aan darno.

Arrintaasna waxaa loo  
yaqaan **is-difaacid**  
**ama iska caabin**.

Hadda waxaan wax ka  
baran doonaa, waxyaabaha  
aan samayn karno, marka  
qaybta maskaxda digniinta  
u qaabilsan ee Amygdala ay  
digniinta bixiso.





Dhammaan dhallaan iyo waayeelba,  
markii cabsi iyo welwel ina soo food-  
saaran, waxaan samynaa, is-difaac,  
carar amase is-dhiibid (quwad-jab).

Fal-celimahaas jidhku, waxay  
inga caawiyaan, in aan  
khataraha iska jirno.

Haddha waxaad ka soo qaadaa, in dugaag (bahal) dad cun ihi uu daaqada kaa soo dhawray (eegay)!

Maan-digaha maskaxdu durbadiiba digniin ayuu bixin. Ka dibna waan waan **is-dhiibna ama quwad-jabnaa.**



Waxa aan is-dhiibna ama quwad-jabnaa, marka aan dareen adag dareeno, taas oo keenta, in cararka iyo is-difaacu uu inaga tago.

Garaaca wadnaheenu wuu xoogaystaa , halka neef-tuurkuna uu kordho.

Qof walba si gaar u ah buu u dareemaa,  
is-dhiibka ama quwad-jabka.

Bal waxaad ka fikirtaa , sida aad adigu dareentid, marka is-dhiib ama quwad-jab uu kugu dhaco?





# Waxaan dareemi lahaa sidan...



...In maankaygu meel  
kale aado (tago)




...In wadnahaygu si deg deg ah  
uu garaaca u badiyo, halka  
ka dibna aan garaaciisa  
maqli kari waayo.



...In aan meel, aan  
joogo, garan waayo



...In talo ay  
iga baahdo





...wax sii baabá aya  
oo kalaan noqdaa

...Waan qaboobaa  
(baraf baan  
noqdaa)



...Qof aan jirin oo  
kalaan noqon lahaa



...Hadal igama soo baxeen



Waan dejin karnaa Jidhkeena, marka aan  
welwel amase cabsi aan dareeno.

Adiga keligaa baa samayn kara amase  
adigoo qof weyn kaashan.

Eeg hareerahaaga, ka dibna ka tiro-koob qolka  
aad joogto,saddex wax oo midab buluug ah leh.



Si tartiib ah neefta hoos ugu  
qaado,..si tartiib ahna, neefta kor  
ugu celi.

Mar labaad si tartiib ah, neefta  
hoos ugu qaado, haddana si tartiib  
ah, kor ugu soo celi.





Isku day , in aad dareento  
waxa aad ku fadhidaa, in  
uu yahay adayg amase  
jileec. Dhaqdhaqaaji faraha  
lugahaaga.



Mar labaad hoos u neefso, haddana si  
tartiib ah, kor ugu soo celi.



Isku day in aad dareento, hadda waxa aad jidhka  
ka dareemayso. Maxaa isbeddeley?

Waxaad xasilooni ka dareemi, wadnaha iyo  
dhanka neef-tuurka, marka uu digniinta  
daayo, maan-digaha maskaxdu.

Dareemada adag, waa sida  
socodka daruuraha oo kale,  
mar taga,marna yimaada.



Markii aan ka fikirnay, bahal dad cunihi, in uu daaqada inaga soo eegay (dhawray), maan-digaha maskaxdu, wuxuu bixiyey digniin, taas oo inoo diyaarisay, in aan cararo


Marka aan dareeno, dareemada adag, naftu orod bay ina tidhaa. Waxaan jecelnahay, in aan meesha ka cararo. Garaaca wadnaheenu wuu kordhaa.

Waxaa kale oo aan dareenaa, neef-tuur iyo culays dhanka cagaha ah.

Fal-carareedka, dadku siyaabo kala duwan ayay u sameeyaan.

Ka fikir waxa adigu dareento, marka aad cararyso amase rabtid in aad cararto ?






# Waxaan dareemi lahaa sida...

...waxaan jeelaan lahaa,  
in aan meesha ka  
fogaado.



...Waxaan jeelaan lahaa, in aan  
u dheereeyo, sida faras oo kale.



...Garaaca wadnahayga,  
durbaan la tumi  
ayaad moodaa

...Naftu waxay  
jeclaataa, in ay  
maqaarka (jidhka)  
ka dhex baxdo



...Sidi qof neef-  
qabatoobay oo kale  
ayaan noqdaa



...Sidi qof wareeray  
oo kale ayaan noqdaa



...Hadalkaan dedejiyaa



...In aan si dhakhso badan  
u cararo ayaan rabaa



Waan dejin karnaa Jidhkeena, marka  
aan welwel amase cabsi aan dareeno.

Adiga keligaa baa samayn kara amase  
adigoo qof weyn kaashan.

Waxaad marka hore adkaysaa faraha lugaha. Marka  
labaadna waxaad dareenta sida murqaha luguhu  
isugu soo ururayaan



Iskud day in aad dabciso,  
faraha lugahaaga



Si tartiib ah neefta hoos ugu  
qaado,..si tartiib ahna, neefta  
kor ugu celi.

Mar labaad si tartiib ah, neefta hoos ugu  
qaado, haddana si tartiib ah, kor ugu soo celi..



Isku day , in aad dareento waxa aad ku  
fadhidaa, in uu yahay adayg amase jileec.  
Dhaqdhaqaaji faraha lugahaaga.

Si tartiib ah neefta hoos ugu qaado,..  
si tartiib ahna, neefta kor ugu celi.  
Mar labaad hoos u neefso, haddana  
si tartiib ah, kor ugu soo celi





Isku day in aad dareento, hadda waxa aad jidhka  
ka dareemayso. Maxaa isbeddeley?

Waxaad xasilooni ka dareemi, wadnaha iyo  
dhanka neef-tuurka, marka uu digniinta  
daayo, maan-digaha maskaxdu.

Dareemada adag, waa sida  
socodka daruuraha oo kale,  
mar taga,marna yimaada.



Markii aan ka fikirnay, bahal dad cunihi, in uu daaqada inaga soo eegay (dhawray), maan-digaha maskaxdu, wuxuu bixiyey digniin, taas oo inoo diyaarisay, in aan iska caabino (celino) dagaal...


Caabintu waxay timaadaa, marka dareemadeenu ay xoogeystaan ee aan xoog in aan iskaga caabino (celino) aan diyaarka u nahay.

Garaaca wadnaheenu wuu kordhaa. Waxaa kale oo aan dareenaa, neef-tuur deg deg ah.

Siyaabo kala duduwan ayaan  
wax iskaga caabinaa(celinaa)

Bal qiyaas, waxa aad dareemi,  
marka aad ku jirto, iska  
caabinta ama celinta?






# Waxaan dareemi lahaa sida....



...in aan tufayo,  
dab holac ah oo kale

...in aan wax ku  
dhufan oo kale

...in aan ahay qof  
xoog badan oo kale





...In ahay, sida qof  
faras ku dagaalami  
oo kale



...In aan sida  
libaax u gooho  
(ciyo) oo kale



...In aan sida holac-  
fulkaano ahay  
oo kale



...In aan sida  
daayeer u  
legdamo oo klae



Waan dejin karnaa Jidhkeena,  
marka aan welwel amase cabsi  
aan dareeno.

Adiga keligaa baa samayn  
kara amase adigoo qof  
weyn kaashan.



Gacmahaaga isugu qabo, sidii adoo kubbad  
gacanta ku riixaya oo kale. Neef qaado ka  
dibna siidaa haynta neefta.

Hal mar oo kale neef hoos u  
qaado, si tartiib ahna neefta  
kor ugu soo saar.





Si tartiib ah neefta hoos  
ugu qaado,..si tartiib ahna,  
neefta kor ugu celi.

Isku day, in aad dareento waxa aad ku  
fadhidaa, in uu yahay adayg amase jileec.  
dhaqdhaqaaji faraha lugahaaga.



Mar labaad hoos u neefso, ka  
dibna sidoo kale si tartiib ah,  
neefta kor u soo celi.



Isku day in aad dareento, hadda waxa aad jidhka  
ka dareemayso. Maxaa isbeddeley?


Waxaad xasilooni ka dareemi, wadnaha iyo  
dhanka neef-tuurka, marka uu digniinta  
daayo, maan-digaha maskaxdu.

Dareemada adag, waa sida  
socodka daruuraha oo kale,  
mar taga,marna yimaada.



Fiiri daaqada,  
runtii bahal dad  
cun ah baa jooga e!





# Waxay iiga dhigan tahay sida....

...In wax badan  
ka dheeraado  
(ka cararo)



...In aan u dagaalamo  
sida qof faras ku  
dagaalami oo kale

...In aana  
muuqan oo kale



...In aana hadli  
karin oo kale





...In sidii faras orod  
dheer oo kale  
aan ahay



...in maanku iga  
tagay oo kale




...In si deg deg ah  
muuqayga loo waayo





...in aan kululahay  
sida fulkaano  
(holac) oo kale





Dhib ma jiree is deji. Keli ah,  
waa bahal dad cun ah oo  
soo habaabbay. Hor-joogaha  
(waardiyaha) dad cunnaha ayaa  
waalidkii wici doona e.





Cabsi bay leedahaym in aad dad  
cunka daaqada ka aragto.

Jidhkeenu, wuxuu  
u fal-celiyey, sidii  
loogu talo-galay



Bal aan mar labaad barano sida  
jidhka loo dejiyo (xasiliyo), ka  
dib marka aan welwel ama cabsi  
dareenay.



Si tartiib ah neefta hoos ugu qaado,,si  
tartiib ahna, neefta kor ugu celi.

Mar labaad hoos u neefso, haddana si  
tartiib ah, kor ugu soo celi



Isku day, in aad dareento waxa aad ku fadhidaa, in  
uu yahay adayg amase jileec.  
Dhaqdhaqaaji faraha lugahaaga.




Mar labaad hoos u neefso, ka dibna sidoo kale si  
tartiib ah, neefta kor u soo celi.



Muxuu rabaa jidhkaagu in uu sameeyo, ka dib  
marka aad dareentay, degenaansho iyo xasilooni?





# Waxaan dareemayaan in aan...

...ciyaaro



...u qosol,  
sida daayr oo kale




...naqaska  
ama neefta meel  
hoose ka  
qaadan karo

...dareenkayga  
xakameeyey



...wax u dhawri,  
sidi qof fiiro  
badan oo kale



...saaxiibahay  
la ciyaaro



...wax barto

...u hadli karo  
si la ii maqli ama fahmi karo



Ku farax in aad bartay, sida  
dareenka jidhkaaga loo dejijo,  
maan-digahnna loo xidho

Hadda waxaad taqaan,  
sida dareemada adag  
loo maareeyo ama  
xakameeyo.



Naftaadu ha ku faraxdo waxa aad  
bartay! Inna keen, waan soconaynaa  
si aan u ciyaaro e!











